

ISKU XIDHNAANSHAHA IYO ISKU DUUBNIDA

**Buug-gacmeed loogu talagalay qoysaska iyo
asxaabta ay dadku uga xiran yihiin xarumaha
asluubta ee gobolka Minnesota**

Ogoosto 2025



Tusmada

Tusmada.....	2
Ujeedada buug-gacmeedkan	1
Sooyaalka iyo macluumaadka xidhiidhka ee MN DOC.....	2
Sidee ayaan ula xidhiidhi karaa qofka aan jeclahay??	3
Maxay tahay inaan ka ogaado booqashada qofka aan jeclahay?.....	5
Ma jiraan ikhtiyaaro gaadiid-raac oo aan ku aado xarunta uu ku jiro qofka aan jeclahay?.....	10
Maxaa shakhsiyaadka xiran loo ogolyahay inay ku haystaan xarumaha iyo maxaa loo keeni karaa?	11
Sidee lacagaha loola tacaalaa inta lagu jiro xarunta DOC?	12
Waa maxay barnaamijyada lagu bixiyo xarumaha DOC dhexdooda?	13
Taageerada dheeraadka ah.....	15
Goobaha ay ku yaalaan xarumaha Waaxda Asluubta.....	17
Ku meelaynta xarunta, shardiyada, ereyada la soo gaabiyay	18
Xogta xarunta	20
Qiraalada.....	30

Ujeedada buug-gacmeedkan

Buug-gacmeedkani waxa uu bixinayaa dulmar guud oo ku saabsan Waaxda Asluubta (DOC) waana kheyraad ka caawin kara asxaabta iyo qoysaska inay xiriir la yeeshaan dadka ay jecel yihiin ee ka xiran. Booqo mareegtayada (<https://mn.gov/doc>) si aad u hesho macluumaadkii ugu dambeeyay.

Gujo-raacan ayaad sidoo kale ka heli kartaa macluumaad aasaasi ah oo khuseeya maalmaha ugu horreeya ee xabsiga:
https://mn.gov/doc/assets/County%20Jail%20Pamphlet_2022_tcm1089-533736.pdf

Fadlan ogow: qaar ka mid ah gujo-raacyada hoose ayaa kaliya lagu heli karaa Af-Ingiriisi. Waxaad isticmaali kartaa bog-mareegeedka ama barnaamijka turjubaanka.

Turjubaanada mareegta ku salaysan

- Google Translate: <https://translate.google.com/>
- Microsoft Bing Translator: www.bing.com/translator

App-yada Telefoonka Gacanta

- Google Translate App (iOS, Android)
- Microsoft Translator App (iOS, Android, Windows)

Haddii uu jiro qof aad jeceshahay oo xabsi ku jira oo aad jeclaan lahayd inaad la wadaagto walaac ama aad siiso jawaab-celin, waxaa jira qaabab aad ula xidhiidhi karto. Qoysaska waxaa lagu dhiirigelinayaa inay si toos ah ula xidhiidhaan xarunta iyagoo isticmaalaya macluumaadka xiriirka ee ku jira [qeybta Xarunta](#) ee buug-gacmeedkan. Sidoo kale cabashooyinkaaga ayaad soo gudbin kartaa adoo u maraya mareegta Xafiiska Dhexdhexaadiyaha Asluubta (OBFC): <https://mn.gov/obfc/>. Xafiiska OBFC wuu ka madax-banaan yahay DOC wuxuuna wax ka qabtaa arrimaha ay soo jeediyaan dadka xiran iyo xubnaha qoysaskooda.

Ra'yigaagu waa inoo muhiim wuxuuna innaga caawin karaa inaan wanaajino wadaxidhiidhka iyo taageerada aad siinayso dadka aad jeceshahay.

Sooyaalka iyo macluumaadka xidhiidhka ee MN DOC

Waaxda Asluubta Minnesota

Aragtida

Gaarida caddaalad iyadoo loo marayo kor u qaadida xaqsoorka jinsiyadeed, ka soo kabashada dhibaataada, iyo isku-xidhnaanta bulshada.

Himilada

Isbeddel nololeed si ay meel ammaan ah u noqoto Minnesota.

Qiyamka

Badqab • Sharaf • Daacadnimo • Adeeg • Xaqsoor • Dhexdhexaadnimo • Ixtiraam

Booqo <https://mn.gov/doc/about/agency-background-history/vision-mission-values/> si aad u hesho xog dheeri ah

Waaxda Asluubta Minnesota – Xafiiska Dhexe

Telefoonka (651) 361-7200

Fakiska (651) 642-0223

1450 Energy Park Drive, Suite 200

St. Paul, Minnesota 55108

<https://mn.gov/doc/contact/doc-directory/>

Baraha bulshada iyo wararka

Wararkii ugu dambeeyay ee DOC, booqo: <https://mn.gov/doc/about/news/>



<https://www.facebook.com/MNDOC/>



<https://www.youtube.com/@MinnesotaDOC>



<https://x.com/minncorrections>



<https://bsky.app/profile/mncorrections.bsky.social>



<https://www.instagram.com/minncorrections>

Sidee ayaan ula xidhiidhi karaa qofka aan jeclahay??

Qofka xiran way isla sii xidhiidhi karaan qoyska iyo asxaabta, waxaana si weyn loogu dhiirigelinayaa inuu sidaasi sameeyo.

Xidhiidhku waxaa loo mari karaa telefoon, boosto, [JPay](#), ama booqashooyin la oggolaaday. Nooc kasta oo wadaxidhiidh ah ayaa leh xeerar u baahan in la raaco.

Si aad ula xidhiidho qofka aad jeceshay, waa inaad sheegto MN DOC Aqoonsigooda Maxbuusnimo (OID), oo la heli karo haddii la booqdo: <https://mn.gov/doc/family-visitor/search-individuals-fugitives/>

Hubso inaad haysato lambarkan, maxaa yeelay inta badan lagu weydiin doonaa.



Sideen lacag u soo diraa?

Waxaad isticmaali kartaa [Jpay](#) si aad lacag ugu dirto qof xabsi ku jira. JPay waa adeeg danabaysan oo lacag lagu xawilo. Hubso inaad mar walba xasuusnaato magaca, lambarka OID iyo xabsiga uu ku jiro qofka xiran. Booqo <https://mn.gov/doc/family-visitor/contact-and-general-information/how-send-money/> si aad u hesho xog dheeri ah.

Waa maxay JPay?

Jpay waa shirkad gaar loo leeyahay oo ka shaqaysa jeelasha iyo xarumaha asxaabta si ay ugu fidiyaan adeegyo dadka xiran, iyo sidoo kale qoysaskooda iyo asxaabtooda. Iyadoo loo marayo JPay, isticmaalayaashu waxay diri karaan lacag, iskula xidhiidhi karaan fariimo elektaroonik ah, waxayna geli karaan qalab kale oo u fududeeya inay xidhiidh joogto ah wada yeeshaan ayna ka maareeyaan hawlaha muhiimka ah.. Booqo: <https://mn.gov/doc/family-visitor/contact-and-general-information/jpay-faq/> si aad u hesho xog dheeri ah



Sidee baan kuugu soo diri karaa muuqaalka duuban?

Si aad u ogaato sida loo diro fiidiyowayada 30-ka ilbiriqsi ah ee la duubo, booqo <https://mn.gov/doc/family-visitor/contact-and-general-information/send-videogram/>



Ma la yeelan karaa wadasheekaysi dhanka telefoonka ah dadka aan jeclahay?

Ma soo wici karaa qofka aan jeclahay?

Maya. Kaliya qofka xabsiga ku jira ayaa wicitaan telefoon samayn kara keliyana xilliyo go'an uun. Haddii aad soo wacdo xarunta, laguguma xidhiidhin doono qofka aad jeceshahay.

Ka warran haddii ay timaado xaalad degdeg ah?

Haddii ay dhacaan dhimasho, xanuun daran, ama dhaawac, wac [xarunta](#) oo u dhaaf farriin aad xaaladda ku sharraxayso. Shaqaaluhu way hubin doonaan farriinta, waxayna gaadhsiin doonaan qofka aad jeceshahay.

Ma inaan bixiyaa lacagta wicitaanada telefoonka?

Maya, lagama qaado wax khidmad ah wicitaanada uu sameeyo qofka xiran Wicitaan telefoon oo sadex-dhinacle ah ama xidhiidhin telefoon looma ogola.

Ma lala socdaa wicitaanada telefoon ama fiidiyow?

Haa. Wicitaanada waa lala socdaa ama waxaa duuba shaqaalaha. Qofka aad jeceshahay waxaa arrintan lagu wargeliyay iyadoo loo marayo ogeysiis qoraal ah, waxaana ogeysiis lagu dhejiyay agagaarka taleefoon kasta. Dhammaan wadaxidhiidhka dhex mara maxaabiista iyo dadka ka baxsan xarunta waa lala socdaa iyadoo laga leeyahay ujeeddooyin ammaan.

Si aad u hesho xog dheeri ah, booqo: <https://mn.gov/doc/family-visitor/contact-and-general-information/phone-calls/>



Ma u soo diri karaa qofka aad jeclahay warqad boosto??

Haa. Marka aad warqad boosto u soo dirto qofka aad jeceshahay, waa la furi doonaa waana la sawiri doonaa, nuqulka boostada ayaa la siin doonaa qofka aad jeceshahay. Eeg <https://mn.gov/doc/family-visitor/contact-and-general-information/how-send-mail/> si aad u hesho xog dheeri ah oo faahfaahsan.

Sidee baan cinwaanka boostada aan ku dirayo u qoraa?

Waa inaad ku soo qorto magaca qofka iyo lambarka DOC OID, magaca xarunta, iyo "Minnesota" (ha soo gaabin). Ogow boostada waxaa marka hore loo diraa xarun ku taala meel ka baxsan Minnesota.

Halkan waxaa ku yaal tusaale sida loo qoro cinwaanka baqshadda loo dirayo ee ku socota qofka ku sugan Xabsiga Minnesota ee ku yaal St. Cloud:

John Doe OID# 000000
MCF-St. Cloud, Minnesota
P.O. Box 247
Phoenix, MD 21131



Sidee baan iimayl ugu diri karaa qofka aan jeclahay?

Si aad u dirto iimayl, booqo bog-mareegeedkan DOC si aad u hesho xog faahfaahsan <https://mn.gov/doc/family-visitor/contact-and-general-information/how-send-email/>. Sidoo kale waxaad samaysan kartaa akoon adoo adeegsanaya TextBehind (booqo <https://www.textbehind.com/>), oo ah adeeg kuu saamaxaya inaad si elektaroonig ah ugu dirto warqado, sawiro, iyo kaararka salaanta dadka aad jeceshahay.

Maxay tahay inaan ka ogaado booqashada qofka aan jeclahay?

Booqashadu waa qayb muhiim ah oo lagu joogteynayo wadaxidhiidhka lala samaynayo qofka aad jeceshahay inta uu xabsiga ku jiro. Xarun [kasta](#) waxay leeydahay jadwal booqasho oo u gaar ah. Hubso inaad booqashadaada qorsheyso inta lagu gudajiro saacadaha booqashada.

Si loo dhawro badqabka qof walba, ogaada in shaqaaluhu ay xoogga saari doonaan ilaalinta kala dambaynta iyo amniga xarunta. Si aad u hesho xog dheeri ah oo faahfaahsan, booqo: <https://mn.gov/doc/family-visitor/visiting-information/visiting-info/>



Miyaan u baahanahay in la ii ogolaado inaan booqdo qofka aan jeclahay?

Haa. Si aad u booqatid qof ku jira xabsiga Minnesota, waa in marka koowaad lagugu daro liiska booqdayaasha la oggolaaday adiga oo buuxinaya Arjiga Mudnaanta Booqasho.

Si aad wax badan uga ogaato geedi-socodka codsiga, booqo: <https://mn.gov/doc/family-visitor/visiting-information/#visiting-applications>

Booqdayaal lama oggola xilliyadan fasaxyada ah:

- Maalinta Sannadka Cusub
- Maalinta Martin Luther King Jr.
- Maalinta Madaxweynaha
- Maalinta Xuska Ciidanka
- Maalinta Dhammaadka Adoonsiga
- 4-ta Luulyo (Maalinta Xorriyadda)
- Maalinta Shaqaalaha
- Maalinta Halyeeyada
- Maalinta Mahadnaqa (Thanksgiving) iyo Jimcaha xiga
- Maalinta Kirismaska

Hubi inaad foomka si buuxda oo daacad ah u buuxiso. Haddii aad bixiso xog been-abuur ah, codsigaaga waa la diidi karaa, waana lagaa horjoogsan karaa inaad booqato xarun kasta muddo cayiman.

Talooyin:

- ✓ Hubin sooyaal ayaa qayb ka ah geedi-socodka codsiga, balse in horay aad u lahayd diiwaan dembiilenimo ama tijaabo dembiile lagu mariyay taasi toos ula mid ma ahan in codsigaaga la diidi doono.
- ✓ Fadlan sug inta xaqiijinta oggolaanshaha kahor inta aadan isku dayin inaad booqato.
- ✓ Booqashadaada awgeed, hubi inaad horay u soo qaadato nuqulka aqoonsiga ee aad ku qortay foomka codsigaaga.



Waa maxay booqasho muuqaal ah?

Booqashada muuqaalka ah ayaa dhammaantood laga heli karaa xarumaha DOC waana la oggolyahay inay qoysaska iyo asxaabta booqasho ka sameeyaan kombiyuutar leh kaamarad (sida, kaamarada dhabsaarka (webcam)). Si aad uga qayb qaadata booqasho muuqaal ah, waa inaad ku jirtaa liiska dadka la oggolyahay ee soo booqanaya qofka xiran.

Si aad u qabsato booqasho muuqaal ah, booqo [Jpay.com](https://www.jpay.com). Haddii aanad horay u samayn, akoon ka sameeyso JPay. Mareegta Jpay ayaa loo sameeyay si aad ballan uga qabsan karto oo keliya marka buud laga heli karo halka uu ku nool yahay qofka xiran. Taasi macnaheedu ma aha, si kastaba ha ahaatee, in qofka aad jeceshahay la heli karo. Adiga iyo qofka aad jeceshahay waa inaad isku afgarataan wakhtiga ballanta kahor.

Booqashada fiidyowga ah waa mudnaan. Shakhsiyaadka qaar ee xiran uma qalmaan booqashooyinka muuqaalka ah sababo la xiriiira xannibaado booqasho ama xaalad anshax-marin. Qofka aad jeceshahay waa inuu ogaadaa inuu xaq u leeyahay in uu helo booqashooyinka muuqaalka ah.

Booqashooyinka muuqaalka ah waa la duubaa waana lala socdaa. Shaqaaluhu way jari karaan booqashada muuqaalka ah haddii qofka xiran ama qofka booqanaya ay dhaqan-xumo sameeyaan, magdhowna lagama bixin doono wixii lacago ah. Shakhsiyaadka xabsiga ku jira iyo booqdayaashuba way waayi karaan xuquuqda booqashada muuqaalka ah haddii ay ku xadgudbaan shuruucda.

Si aad u hesho xog dheeri ah oo ku saabsan booqashada muuqaalka ah, oo ay ku jiraan sida loo sameeyo booqasho muuqaal ah, kharashaadka, iyo xeerarka booqashada, booqo: <https://mn.gov/doc/family-visitor/visiting-information/video-visitation/>



Waa maxay booqasho toos ah?

Booqashada tooska ah waxay ka dhacdaa goobta booqashada, waxaadna qolka la joogi doontaa qofka aad jeceshahay adigoo ku fadhiisanaya kursi lagu qoondeeyay. **Xidhiidhka jireed wuxuu ku xaddidan yahay hal dhunkasho oo kooban oo dhabanka ah, hab isa siin, iyo is gacan-qaad bilowga iyo dhammaadka booqasho kasta.**

Adiga iyo qofka aad jeceshahay waxaad mas'uul ka tihiin dhaqankiina inta lagu gudajiro booqashada. Haddii aad raaci waydo sharciyadda, booqashadaada waa la joojin karaa. Cawaaqib kale ayaa wehlin karta, sida in aydan is-taaban karin ama lagaa xannibo inaad mustaqbalka soo booqato. Uga faa'iidayso sida ugu fiican booqashooyinkaaga adiga oo raacaya xeerarka si aadan halis u gelinin xuquuqdaada booqasho.



Waa maxay booqasho aan tooska ahayn?

Marka aad samaynayso booqashada aan tooska lahayn, waxaad ku jiri doontaa buud waxaadna isticmaali doontaa telefoon ama kaamarad fiidiyow aad kula xidhiidho. Booqashada noocan ah, waxaa idiin dhexeeya xannibaad. Booqashooyinkan waa in la qorsheeyaa 24 saacadood kahor. Dadka ku xiran goobaha xannibaadda waxaa loo oggol yahay oo keliya booqashooyin aan toos ahayn. Booqashooyinka aan tooska lahayn waxaa kale oo la isticmaalaa haddii qofka booqanaya uusan mari karin qalabka birta baaraya, ama haddii qofka booqanaya ama qofka xiran uu jebiyo xeerka booqashada lana geliyo xaalad aan la isu ogolayn taabasho.

Ma jiraan xeerar iyo xayiraado booqasho marka aan qofka aan jeclahay si shakhsi ahaan ah ula kulmayo?

Waa muhiim in laga warqabo **sharciyadda booqasho** iyo inaad og tihiin waxa la idin ka filan karo adiga iyo qofka aad jeceshahay. Tani waxay u sahlaya qof walba inuu dareemo nafis intii suurtagal ah, iyo inay kaa caawiso inaad diirada saarto booqashada.

Shaqaalaha xarunta waxay hiigsanayaan inay noqdaan kuwo soo-dhaweyn leh, laakiin sidoo kale waa inay ilaaliyaan kala dambeynta, badqabka, iyo amniga xarunta. Shakhsiyaadka xiran iyo dadka soo booqanaya waa inay raacaan sharciyadda. Raacitaan la'aanta sharciyadda waxay keeni kartaa digniin, joojinta booqashada, ku meeleynta booqasho aan toos ahayn, ama hakinta ama kala noqoshada xuquuqda booqashada.

Habdhaqanada booqasho way ku kala duwanaa karaan xarun kasta iyadoo lagu salaynayo qaab-dhismeedkooda iyo baahiyaha amniga. Xog dheeri ah oo ku saabsan booqashada ayaa laga heli karaa mareegta DOC:

<https://mn.gov/doc/family-visitor/visiting-information>

Ma jiraan shuruuc gaar ah oo loogu talagalay booqashooyinka carruurta?

U soo wadida ilmaha booqashada ayaa noqon karta hab macno leh oo ay ugu xirnaadaan qofka ay jecel yihiin ee xabsiga ku jira, isla mar ahaantaana inuu sii socdo xiriirkooda. Si looga hortago dib u dhac kasta oo aan la filayn oo booqashada ku iman kara oo ka dhigi kara mid aan wanaagsanayn, hubi in adiga iyo ilmaha aad fahamsan tihiin xeerarka oo aad taqaanaan waxa la idinka filayo.

Xarun kasta waxay leedahay xeerar kala duwan oo khuseeya booqashada carruurta. Xarumaha qaarkood ayaa leh qol carruurtu ku ciyaaraan. Waxayna oggolaan karaan in lala soo galo warqad iyo kalooraatiyo wax lagu sawiro, halka kuwa kale laga yaabo in aysan oggolayn. Waa fikrad fiican inaad wacdo xafiiska booqashada kahor inta aadan ilmaha u soo wadin booqashada si aad u ogaato waxa la oggol yahay. Waxaad heli kartaa lambarro taleefoon oo ku jira mareegta DOC: <https://mn.gov/doc/family-visitor/visiting-information/>.

Tilmaamaha booqashooyinka carruurta:

- Sharciyadda Booqashooyinka ee Gobolka oo Dhan [waxay bixiyaan xog ku saabsan booqashada carruurta halkan ayaana laga heli karaa:

Ingiriisi: https://mn.gov/doc/assets/302.100K-English_tcm1089-700039.pdf

Isbaanish: https://mn.gov/doc/assets/302.100K-Spanish_tcm1089-700038.pdf
- Qof kasta oo ka yar da'da 18 jir waa inuu soo raacaa waalidkii ama mas'uulka sharciga ah.
- Kahor inta aysan booqan, ilmaha ka yar 18 jir waa in lagu daraa liiska booqdayaasha qofka xiran. Dib u eeg arjiga booqashada si aad u ogaato sida loogu daro dadka da'doodu ka yar tahay 18 jir liiska booqdayaasha.
- Haddii uu ilmuhu la socdo qof weyn oo aan ahayn waalidkiis ama mas'uulkiisa sharciga ah, codsiga booqashada waa in lagu daraa oggolaansho ay saxiixeen oo la caddeeyey (notarized) waalidka ama waalidiinta ilmaha.

Kahor inta aadan ilmo u geynin inuu arko waalid, u diyaari ilmaha booqashada xabsiga. Haddii ay suurtagal tahay, marka hore keligaa soo booqo si aad ugu sheegi karto sida xaruntu u eg tahay, halka booqashooyinka ka dhacaan, inta booqashadu socon doonto, waxa ay yihiin shuruudka booqashada, iwm. Booqashadu way fududaan kartaa haddii aad la wadaagto sawirrada xabsiga adoo booqanaya [gaybta hoose ee xarumaha](#) ama mareegta DOC:

<https://mn.gov/doc/about/photos-videos>

Maxaan layga oggolaan inaan keeno xilliga booqashada?

Kaliya soo qaado xarunta alaabta lagama maarmaanka ah, kana tag gaarigaaga alaabta aan qiimo lahayn haddii ay suurtagal tahay. Waxaa sidoo kale jira sanduuqyo ku yaal qolka soo gelitaanka oo aad alaabtaada ku ridi karto. Laguuma oggolaan doono inaad keento goobta booqashada waxyaabo ay ka mid yihiin boorsada jeebka ama boorsada gacanta.

Waa sharci-darro in alaabta soo socota la keeno xarunta asluubeed:

- Hub
- Rasaas
- Basbaaska la buufiyo
- Khamri ama mukhaadaraad
- Tubaako ama nikotiin
- Waraaqo ama agab kale oo wax lagu qoro
- Shiddo (lighter)
- Telefoonada gacanta
- Kaamirooyin
- Qalabka codka lagu duubo

Shaqaalaha xarumuhu waxay sameeyaan baaritaano amni si loo hubiyo in aan alaab mamnuuc ah la keenin xarumaha dhexdooda. Waa lagaaga baahan doonaa inaad marto biraha baaritaanka ama lagugu baaro qalabka birta baaritaanka (oo loo yaqaano usha ammaanka) kadib markaad isdiwaangeliso iyo inta aadan u gudbin aagga booqashada.

Iska bixi dhammaan dahabka birta ah iskana ilaali inaad xidhato dhar ay ku jiraan biro, iyo waxyaabaha ay ka midka yihiin nigisyada birta leh iyo kuwa biruhu ka lushaan.

Shaqaalaha amaanka waxay kuu sheegi karaan inaad oggolaato baaritaan jireed haddii uu jiro tuhun macquul ah ama haddii aad ku guuldareysato inaad ka gudubto qalabka baaritaanka. Xaq baad u leedahay inaad diido baaritaanka jireed, laakiin haddii aadan marin qalabka birta baaraya oo aad diido baaritaanadan, booqashadaada waxaa laga yaabi karaa in la diido ama loo beddelo booqasho aan toos ahayn. Inta badan, baaritaanada waxaa samayn doona shaqaale kugu jinsi ah.



TALO: Xarumaha qaarkood, waxaa inaad u haysato labaatan iyo shan senti si aad u isticmaasho sanduuqa. Haddii aadan u haysan, shaqaalaha ayaa ku siin kara labaatan iyo shan senti, oo aad soo celin doonto marka la furayo sanduuqa.

Si aad u hesho xog dheeri ah, waxaad booqan kartaa siyaasadda baaritaanada amni iyo kontarabaanka:

<https://policy.doc.mn.gov/DOCPolicy/PolicyDoc?name=301.030.pdf>

Ma jiraan xayiraadyo dhar ah marka la booqanayo xarunta?

Waaxda DOC waxay leedahay xeer dhar oo loogu talagalay dhammaan booqatada si loo hubiyo in alaab kontarabaan ah in aysan la is-dhaafsanin booqatada iyo qofka xiran. Shaqaaluhu waxay awood u leeyihiin inay go'aamiyaan nooca labbiska booqasho ee la aqbali karo, go'aankooduna waa kamadambays. Haddii booqashadaada la diido dharkaaga awgood, waxaad awoodi doontaa inaad ka baxdo xarunta si aad isaga soo beddesho dharka aadna ugu soo noqoto xarunta ganaax la'aan.

Si aad u hesho xog dheeri ah, eeg qeybta booqashada ee mareegta DOC (hoos ka eeg).

Gujo-raacyada lagu helo shuruucda booqashada

- **Bogga hore ee booqashada DOC**
<https://mn.gov/doc/family-visitor/visiting-information/>
- **Shuruucda qolka booqashada ee ka jira gobolka oo dhan**
https://mn.gov/doc/assets/302.100K-English_tcm1089-700039.pdf
- **Xannibaadaha booqasho ee loogu talagalay booqatada**
https://mn.gov/doc/assets/302.100C%20Visiting%20Restrictions%20for%20Visitors_tcm1089-420804.pdf
- **Xannibaadaha booqasho ee loogu talagalay dadka xiran**
https://mn.gov/doc/assets/Visiting%20Restrictions%20for%20Offenders-302.100B-English-2017_tcm1089-277642.pdf

Ma heli karaa wargelinta ku saabsan jadwalka booqashada iyo xeerarka?

Haa, waad isku diiwaangelin kartaa si aad u hesho wargelinada ku saabsan isbeddelada ku yimaada jadwalka booqashada ama shuruucda ee aad u heli doonto iimayl ahaan ama farriin gaaban ahaan.

Guji si aad u rukumato

https://public.govdelivery.com/accounts/MNCORR/subscriber/new?topic_id=MNCORR_23

Ma jiraan ikhtiyaaro gaadiid-raac oo aan ku aado xarunta uu ku jiro qofka aan jeclahay?



Haddii uu gaadiid-raacu caqabad yahay, waxaa jiri kara ikhtiyaaro la heli karo. Waa fikrad wanaagsan in lala soo xiriiro [xarunta](#) kal hore si aad wax uga weydiiso ikhtiyaarada gaadiid-raaca ee jira, maadaama adeegyada iyo siyaasadaha ay isbeddeli karaan.

- **Gaadiidka dadweynaha**
Halka inta badan xarumaha asluubtu ay ku yaalaan miyiga ama agagaarka magaalada, magaalooyinka qaar (sida Minneapolis ama St. Paul) ayaa soo bandhiga gaadiidka dadweynaha oo ku geyn kara meel u dhow xarumaha qaarkood. Si kastaba ha ahaatee, ka soo raacida boostaajada baska ama tareenka yar ee lagu yimaado xarunta lafteeda ayaa laga yaabaa inay weli u baahato taksi, gaari-wadaag, ama baabuur gaar ah.
- **Gaar-wadaaga iyo taksiyada**
Dadka aan heli karin barnaamijyada gaadiid-raaca, adeegyada gaari-wadaagista sida Uber ama Lyft ayay u isticmaali karaa in ay ku tagaan kagana yimaadaan xarumaha asluubta. Si kastaba ha ahaatee, ikhtiyaarkani ayaa noqon kara mid qaali ah waxaana adkaan kara in laga helo miyiga, markaa hubso inaad horay u sii qorsheysato.
- **Hay'adaha is-xilqaama**
Qaar ka mid ah barnaamijyada is-xilqaamka ah iyo kuwa aan faa'iido doonka ahayn ayaa laga yaabaa inay bixiyaan gaadiid bilaash ah ama qiimihiisu jaban yahay oo lagu tago lagagana yimaado xarumaha asluubta. Bulshada deegaanka iyo ururada diimeed ayaa laga yaabaa inay kaalmo bixiyaan, inkastoo helitaanku kala duwanaan karo.
- **Khayraadka maamulada gobolada iyo degmooyinka**
Degmooyinka qaarkood ayaa laga yaabaa inay bixiyaan barnaamijyada kaalmada gaadiid-raaca ee loogu talagalay qoysaska, gaar ahaan kuwa degan miyiga. Waxaa habboon in aad ka hubiso xafiisyada dawladda hoose si aad u ogaato in ay jiraan barnaamijyo noocaas ah oo la heli karo.

Maxaa shakhsiyaadka xiran loo ogolyahay inay ku haystaan xarumaha iyo maxaa loo keeni karaa?

Shakhsiyaadka xiran waxaa loo ogolyahay in ay ku haystaan waxooga alaabo gaar ah xarunta dhexdeeda, marka lagu daro alaabta ay dawladu bixiso. Dhammaan alaabtu waa in shaqaaluhu baadhaan. Qof kasta waa looga baahan yahay inuu alaabtiisa gaarka ah ku kaydiyo qolka/aagga uu ku nool yahay.

Maxaa laga bixiyaa xarumaha?

Dadka ku jira xarumaha DOC waxaa la siiyaa dhar marka hore ee la diiwaangelinayo (tusaale, surwaal, shaadh, nigisyo, sharabaado, kabo, kabaha qubeyska, bacda dharka wasaskhda ah, jaakad, koofiyad, iyo rijastiin). Sidoo kale way soo iibsaa karaan alaabta.

Qof kastaa wuxuu mas'uul ka yahay inuu si fiican u xafido alaabta uu gobolku siiyo waxayna codsan karaan in alaabta laga beddelo sannadkiiba mar.

Alaabta la oggol yahay xilliga diiwaangelinta:

Alaabta la oggol yahay (isbeddeli karta) waa la baadhi doonaa waan ala qori doonaa. Si aad u hesho xog dheeri ah, booqo: <https://policy.doc.mn.gov/DOCPolicy/PolicyDoc?name=302.250.pdf>

- Hal ookiyaale oo uu dhakhtar qoray
- Hal faraq-gashiga arooska oo saafi ah (aan dhagax lahayn) – dahab kale lama oggola
- Ilkaha macmalka ama buuxiska ah
- Qalabka xibnaha macmalka ah ee caafimaad ahaan la oggolaaday
- Hal buugga cinwaanada ah (birta wareegsan aan lahayn)
- Labaatan sawirro oo gaar ah - waa inay buxiyaan shuruudda DOC (sawirradu dhererkoodu kama badnaan karo 8x10)
- Agabka sharci - waraaqaha oo keliya
- Alaabta leh ahmiyad diimeed (tirada alaabta waa la xaddidi karaa)

Alaabtani waxaa lagu keydin doonaa faylashooda DOC:

- Lacagta (jeegga degmada ama foojar la doorbidayo, in lagu rido akoonka shakhsiga xiran ama loo hayo ilaa inta laga siidaynayo)
- Shatiga darawalnimo ee ugu dambeeyay ama kaarka aqoonsiga gobolka (lama oggola boorso)
- Kaarka Sooshiyaal Sikiyuuritiga
- Baasabo, warqad dhalasho, Aqoonsi Qabiil

Sidee lacagaha loola tacaalaa inta lagu jiro xarunta DOC?

Shakhsiyaadka xiran lacag uma baahna si loo buuxiyo baahidooda maalinlaha ah. Xarun kastaa waxay bixisaa dhammaan cuntada, dharka, iyo daryeelka caafimaadka ee lagama maarmaanka ah. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jiri kara waxyaabo uu qofku rabi karo inuu ka iibsado xarunta dhexdeeda.

Dadka aan jeclahay wax ma iibsan karaan inta ay xiran yihiin?

Xarun kasta waxaa ku yaala dukaan, sidoo kale loo yaqaano Kanteenka, halkaasi oo shakhsiyaadka xiran ay ka iibsan karaan alaabta la oggol yahay. Waxay ka iibsan karaan cuntooyinka fudud iyo alaabta sida telefishino, raadiyo, dheryaha cuntada diiriya, iyo nalal iyo waxyaabo kale oo badan. Waxa jira xaddidaad khusaysa tirada iyo noocyada waxyaabaha la iibsan karo.

Lacag ayaad ku dari kartaa akoonka qofka aad jeceshahay adoo u maraya [JPay](#).

Xaddidaadaha iyo xogta kharashka lagu bixiyo kanteenka (laga soo bilaabo Luulyo 2025)

- \$170 isbuucii xarumaha dadka waaweyn
- \$50 isbuucii xarumaha dhallinta ee ku yaala Red Wing
- Xaddidaada kharashku kuma jiraan telefiishannada, qalabka wax lagu qoro ee korontada ku shaqeeya, qalabka warbaahinta, ama kharashka cawil-celinta
- Xaddiga kharashka wuu kala duwanaan karaa dadka ku jira goobaha xannibaadda.

Waa maxay sharciyadda khuseeya iibsashada alaabta?

Dadku waxay wax ka iibsan karaan ama ka heli karaan kaliya Kanteenka ama iibiyayaasha ay ansixisay waaxda asluubta (fiiri liiska ku jira [bogga 11](#) ee muujinaya alaabta la oggol yahay). Shakhsiyaadka looma oggola inay ka ganacsadaan, bixiyaan, qaataan, amaahiyaan, ama wax iska kala iibiyaan. Haddii qofku lagu helo arrintan, dhibaato ayuu wajihi karaa. Fadlan tixraac siyaasadda Kanteenka:

<https://policy.doc.mn.gov/DOCPolicy/PolicyDoc?name=302.010.pdf>

Waa maxay barnaamijyada lagu bixiyo xarumaha DOC dhexdooda?

Xarumaha DOC waxay soo bandhigaan barnaamijyo, sida caadiga ay xarumuhu ku kala duwan yihiin. Qofka aad jeceshahay ayaa ogaan doonaa barnaamijyada la helo xaruntooda inta lagu gudajiro kalfadhiga hanuuninta marka ay xarunta yimaadaan.



Ma ka jiraan fursado waxbarasho iyo xirfadeed xarumaha dhexdooda?

Waxaa ka jira barnaamijyo waxbarasho iyo/ama xirfadeed oo laga heli karo mid kasta oo xarumaha DOC ah. Xarumaha oo dhan waxay bixiyaan waxbarashada dugsiga sare, taasi oo siisa fursado shakhsiyaadka si ay u helaan shahaadada dugsiga sare ama mid u dhiganta (GED, tusaale ahaan). Xarumo dhowr ah ayaa sidoo kale bixiya barnaamijyada waxbarashada dugsiga sare kadib taasi oo natiijadeedu tahay xirfad iyo shahaado farsamo, shati xirfadeed, ama shahaadooyin jaamacadeed. Si aad u hesho xog dheeri ah booqo: <https://mn.gov/doc/staff-partners/education/>



Maxay yihiin fursadaha madadaalada ee laga heli karo xarumaha?

Dhammaan xarumuhu waxay bixiyaan barnaamijyo madadaalo. Barnaamijyadani waxaa ku jiri kara nashaadyo kala duwan, oo ay ku jiraan ciyaaraha, ciyaaro fiidiyow iyo ciyaaraha miiska, iyo adeegyada maktabadda. Shakhsiyaadka xiran waxaa la siiyaa gobo madadaalo iyo qalab, oo ay ku jiraan nashaadyada bannaanka lagu sameeyo marka cimiladu saamaxayaan. Goobaha madadaaladu waxaa ka mid ah barxadaha bannaanka ku yaala, goobaha jimicsiga, iyo goobaha la wadaago ee ku yaala qololka lagu nool yahay.



Waa maxay adeegyada diimeed iyo kuwa ruuxiga ah ee la heli karo?

Xarun kasta waxay bixisaa fursado lagu sameeyo caqiidada iyo dhaqamada diimeed ee shakhsiga u gaarka ah. Jadwalka dhammaan hawlaha diimeed iyo ruuxeed ayay heli karaan dadka oo dhan. Waxaad wici kartaa xarunta oo weydiisan kartaa xafiiska wadaadka inuu xaqiijiyo goorta adeegyada la qabto ama inaad codsato nuqulka jadwalka.



Ma ka jiraan barnaamijyo daawayn gudaha xarumaha?

Daaweynta cillada isticmaalka maandooriyaha

Iyadoo ay jiraan 1,000 cilladaha isticmaalka maandooriyaha (SUD) ah sariiraha daawaynta ee nidaamka asluubta gobolka Minnesota ku jira, waaxda DOC ayaa bixisa adeegyada SUD oo aan kala'go' lahayn, oo ay ku jiraan seexin bukaan-socodka, daawaynta degdegga ah ee bukaan-socodka, iyo heerarka daryeelka bukaan-socodka ee baahsan. Barnaamijyada daawaynta ee DOC si joogto ah ayaa dib loogu eegaa inay u hoggaansanaan yihiin heerarka shahaadaynta gobolka.

Daaweynta xadgudubka galmo

Waaxda DOC waxay bixisa barnaamijyo seexin oo heer dhexdhexaad ah iyo kuwo muddo-dheer ah, oo ay ku jiraan daaweynta cilladaha isticmaalka maandooriyaha, barnaamij gaar ah oo loogu talagalay shakhsiyaadka caqliga iyo garaadka kala duwan leh, iyo barnaamij kala-guur oo ballaaran oo qof walba loogu diyaarinayo siideynta.

Daaweynta caafimaadka maskaxda

Adeegyada caafimaadka maskaxda waxaa ka mid ah adeegyada taageero, kooxaha is-caawinta shakhsiga, qiimaynada, iyo daawaynta muddada-gaaban ee arrimaha aan halista ahayn iyo daawaynta muddada dheer, daawaynta degdegga ah ee arrimaha caafimaadka maskaxda ee aadka u daran taas oo wiiqaysa awoodda qofka u leeyahay inuu wax qabto ama wax ka jawaab-celiya inta lagu gudajiro hawl maalmeedka.

Daryeelka caafimaad iyo kalkaalinta

Waaxda DOC waxay daryeelka caafimaadka, daryeelka ilkaha, iyo kalkaalin u siisaa dadka xiran si maalinle ah. Dhammaan dadka ay daryeesho waaxda DOC waa la baaraa waana la qiimeeyaa baahiyahooda caafimaad iyo daawayn marka la diiwanagelinayo.



Taageerada dheeraadka ah



Khayraadka loogu talagalay qoysaska ee Waaxda Asluubta MN

- **Stronger Together** - Waxay siisaa hagitaan, fikrado, iyo qalab wax ku ool ah daryeel-bixiyayaasha dadka xiran ee taageera carruurta inta uu waalidku xabsiga ku jiro. Waxay wax ka qabataa walaacyada qoyska iyo dadka la jecel yahay waxayna siisaa awood ay ku kobciyaan xidhiidhada togan.
https://mn.gov/doc/assets/Stronger-Together-Vol-3_tcm1089-545124.pdf
- Booqo <https://mn.gov/doc/family-visitor/children-incarcerated-parents/> si aad u hesho agab taageero oo dheeri ah oo loogu talagalay qoysaska, gaar ahaan carruurta iyo daryeelayaasha, kuwaasi oo u socdaalaya xabsiga uu ku jiro waalidka.



Khayraadka dibadeed ee qoysaska

- **Khayraadka loogu talagalay Qoysaska Xiritaanku Saameeyay - Carruurta Daryeel-bixiyayaasha Xiran**
<https://cicmn.org/wp-content/uploads/2018/09/Resources-for-Families-Edited-918.pdf>
- **Buug-gacmeedyada Stronger Together - Ururka Osborne Association**
Saddexdan buug waxaa ku qoran mahadhooyinka carruurta waalidiintooda la xiray, xeeladaha joogteynta xidhiidhka qoyska, iyo hagidda daryeelayaasha aan waalidka ahayn. <https://www.osborneny.org/stronger-together-handbooks>
- **Buug-gacmeedka Families Strong – Resilience Beyond Incarceration**
Waxaa loogu talagalay qoysaska, dadka ay jecel yihiin, daryeelayaasha, iyo xirfadlayaasha, buug-gacmeedkani wuxuu bixiyaa hagid ku saabsan taageerida carruurta iyo qoysaska ay saamaynta ku yeelatay xiritaanka waalidka. <https://lrcvt.org/wp-content/uploads/2024/07/families-strong-for-web-V2.pdf>



Taageerada ilmaha

Haddii waalidka xiran uu qabo su'aalo ama walaacyo ku saabsan masruufka ilmaha ama ogaanshaha aabbaha, fadlan ha la xiriiraan Xiriiriyaha Taageerada Ilmaha ee Waaxda Asluubta. Waxay diyaar u yihiin inay bixiyaan xog sax ah, inay ka jawaabaan walaacyada, iyo inay habraacaasi ka caawiyaan waalidiinta xiran.

<https://mn.gov/doc/community-supervision/reentry-services/031-family-friends-partners/family-supports-unit/>



Khayraadka kala duwan

- **Cuntada iyo nafaqaynta:** Si aad u hesho xog dheeri ah oo khuseysa cuntada iyo nafaqaynta laga bixiyo xarumaha asluubta ee Minnesota ku yaala, booqo: <https://mn.gov/doc/about/menus-and-nutrition/>
- **PREA:** DOC ma oggola wax xadgudub galmo ah, weerar ah, ama dhibaatayn ah inay ka dhacaan xarumaheeda. Shaqaalaha, is-xilqaamayaasha, iyo qandaraaslayaasha looma oggola inay xiriir galmo la sameeyaan dadka xiran. Qof kasta oo jebiya sharcigan wuxuu mutaysan karaa cawaaqib daran, oo ay ku jirto tallaabo sharciyeed. Si aad u hesho xog dheeri ah oo ku saabsan siyaasaddan, booqo: <https://mn.gov/doc/about/prea-policy/>
- **Xammilitaanada Xeerka Naafada Maraykanka (Americans with Disabilities Act, ADA):** Si loo helo xog ku saabsan siyaasadaha, habraacyada, iyo hindisooyinka Xeerka ADA ee Waaxda DOC ee taageera helitaanka iyo kuwa bixinta shaqada iyo adeegga, booqo: <https://mn.gov/doc/about/diversity-inclusion-ada/americans-disabilities-act-ada/>
- **Xarunta Daahfurnaanta:** Waxaa ku jira istaastikada barnaamijyada, shuruucda xog-dhowrista, xaanshiyaha xaqiiqda, cilmi-baaris, siyaasado, warbixinada xeer-dejinta, iyo Qorshaha Xeeladeed ee DOC booqo: <https://mn.gov/doc/transparency-center/>



Dib-u-mideynta iyo ka bixida xarumaha DOC

Xarun kastaa waxay bixisaa barnaamijyo iyo adeegyo kala duwan si loo taageero shakhsiyaadka inta ay ku jiraan DOC iyo kadib marka ay ku noqdaan guriga. Kuwani waa khayraad ay qabanqaabiso Qaybta Adeegyada Dib-ula-Midowga Qoyska ee DOC, iyagoo la shaqeeya shaqaalaha xarumaha, wakaaladaha maxalliga ah iyo kuwa gobolka, kooxaha diimeed, ururada bulsheed, iyo shakhsiyaadka daryeelka bixiya ee ka midka ah bulshada. Booqo: <https://mn.gov/doc/community-supervision/reentry-services/011-getting-out/>

Goobaha ay ku yaalaan xarumaha Waaxda Asluubta



Ku meelaynta xarunta, shardiyada, ereyada la soo gaabiyay

Maxaa loo adeegsadaa go'aaminta xarunta qofka la geynayo?

Qofka waxaa lagu meeleeyaa xarun asluubeed oo gaar ah iyadoo la eegayo arrimo badan.

- ▶ Xarunta Asluubta ee Minnesota-St. Cloud (SCL) waa xarunta diiwaangelinta ee ku dhowaad dhammaan ragga waaweyn. Waxay ka bilaabaan SCL qorshaynta kiiska iyo hanuuninta, ka dibna waxaa loo wareejin karaa xarun kale iyadoo lagu salaynayo kala soocidda, siyaasadaha waaxda, barnaamijyada, iyo baahiyaha waxbarasho iyo caafimaad. Diiwaangelinta raga da'doodu ka yar tahay 18 jir balse wata caddaynta inay qaangaareen ayaa ka dhacda Xarunta Asluubta Minnesota-Lino Lakes (LL).
- ▶ Kuwa ku xadgudba siidaynta—ragga waaweyn ee lagala noqdo siidaynta la kormeero—waxaa lagu qaabilaa Xarumaha Asluubta Minnesota-Lino Lakes (LL), Faribault (FRB), Rush City (RC), iyo Shakopee (SHK).
- ▶ Shakopee waa goobta diiwangelinta iyo xarunta la dhigo haweenka qaangaarka ah oo dhan.

Nidaamka kala-soocida

Qof kasta oo xiran ayaa loo qoondeeyaa nooc kala soocid, kaasi oo ah qaddarta kormeer ee looga baahan yahay. Kala-soocida ayaa hagta xarunta lagu meelayn doono, taasi oo iyaduna saamaynaysa barnaamijyada la heli karo maadaama xarumaha kala duwani bixiyaan barnaamijyo daaweyn, fursado shaqo, xoriyado dhaqdhaqaaqa oo kala duwan, iwm. Nooca kala-soocida ee qofka way isbedeli kartaa inta uu xiran yahay iyadoo lagu salaynayo dabeecad wanaaga, edbaata, daawaynta isticmaalka maandooriyaha, iwm. Si aad u hesho xog dheeri ah, booqo siyaasadda Nidaamka kala-soocida, booqo: <https://policy.doc.mn.gov/DOCPolicy/PolicyDoc?name=202.100.pdf>

Erey-bixinta Caamka ah ee Waaxda Asluubta

Saldhigga (Bubble) Saldhig leh xayndaab quraarad ka samaysan oo u sarkaal ku jiro

Kanteen (Canteen) Dukaanka xarunta

Tirinta (Count) Xisaabin hubin ah oo lagu sameeyo qof kasta oo xiran dhowr jeer 24-saac gudahooda

Calan (Flag) Goob madadaalo oo ku taala sagxada hoose qolka lagu nool yahay

Sareed/Darajo (Galley/Tier) Xarumaha qadiimiga ah, kuwani waa heerarka xabsi ee ku yaala qayb kasta oo lagu nool yahay

Aabiteey (Kite) Wareegto xarumeed oo loogu talagalay qofka xiran si uu ula xiriiro shaqaalaha

Xidhitaanka/Xannibaada (Lockup/Lockdown) Hawlaha caadiga ah ee dhammaan ama qayb ka mid ah xarunta ayaa la joojiyaa

Lacag maxbuus (Scrip) Lacag uu iska leeyahay qofka xiran

Goobaha xannibaadda (Restrictive Housing) Xaddidaada hoyga lagu nool yahay ee ay ku jiraan dadka jebiyio shuruucda ama u baahan ilaalinta, waxaa sidoo kale loo yaqaanaa “seg” ama “ka soocida dadka kale”

Goobta gelida (Sally Port) marin la kontoroolo oo laga soo galo oo loogu talagalay wareejiinta ammaanka ah ee shakhsiyaadka gelaya ama ka bixaya dhismaha

Wakhtiga Gelida/Ka Bixida (Switch In/Switch Out) Wakhti waajib ah oo la galo lagana baxo qolka ama qololka xabsiga

Ereyada La Soo Gabiyo ee Caamka ah ee Waaxda Asluubta

ABE (Adult Basic Education) Waxbarashada aasaasiga ah ee dadka waaweyn (barnaamijyada waxbarasho ee laga bixiyo xarumaha DOC oo dhan)

AOD (Alcohol and other Drugs) Khamriga iyo maandooriyeyaasha kale (ka tixraac barnaamijyada daawaynta ee laga helo dhowr xarumaha DOC ah)

CD (Chemical Dependency) Ku tiirsanaanta daawooyinka

CIP (Challenge Incarceration Program) Barnaamijka Caqabada Xabsiyada (xarumaha Willow River, Shakopee, iyo Togo)

CM (Case Manager) Maamulaha kiiska

CO (Corrections Officer) Sarkaalka asluubta

DOC (Department of Corrections) Waaxda Asluubta

ICWC (Institution/Community Work Crew) Hawlwadeenada Hay'adeed/Hawlaha Bulsheed (barnaamijka adeeg ee waaxda DOC ee ka jira bulshada dhexdeeda)

IR (Incident Report) Warbixinta dhacdada

ISR (Intensive Supervised Release) Siideynta Kormeerka leh ee Degdegga ah (heerka kormeerka la xoojiyo)

LOP (Loss of Privileges) Luminta mudnaanta (xakamaynta ka dhalata dhaqan-xumada ka dhex dhacda xarunta)

MCF (Minnesota Correctional Facility) Xarunta Asluubta Minnesota

MHU (Mental Health Unit) Qaybta caafimaadka maskaxda

OID (Offender Identification) Aqoonsiga Maxbuuska (lambar aqoonsi oo loo qoondeeyo qof kasta oo ku xiran xarumaha DOC ku jira)

PO (Probation/Parole Officer) Sarkaalka tijaabada xabsiyeed ama siideynta sharafeed

PSI (Pre-sentence Investigation) Baaritaanka xukunka kahor (warbixinta sooyaalka bulsheed ee ay maxkamaddu amarto)

PRT (Program Review Team) Kooxda dib-u-eegista barnaamijka (shaqaalaha waaxda DOC ee dib-u-eegista ku sameeya dadka xiran oo soojeediya barnaamijyada)

SRD (Supervised Release Date) Taariikhda siidaynta la kormeero (taariikhda qofka la siidaayo si loogu kormeero bulshada dhexdeeda)

Xogta xarunta

Faribault



Xarunta Asluubta Minnesota–Faribault waxaa la dhigaa ragga qaangaarka ah.

Waxaa loo aqoonsan yahay xarun amni heerkiisu yahay mid hooseeya iyo mid dhexdhexaad ah.

Si aad ula xiriirto qofka aad jeceshahay, booqo mareegta Waaxda Asluubta:

<https://mn.gov/doc/family-visitor/contact-and-general-information/>

Si aad u hesho jadwalka booqasho iyo
macluumaadka barnaamijka ee ugu dambeeyay,
booqo mareegta xarunta: <https://mn.gov/doc/facilities/faribault/>

MCF-Faribault.doc@state.mn.us

Telefoonka (507) 334-0700

Fakiska (612) 473-5066

1101 Linden Lane

Faribault, Minnesota 55021



Lino Lakes



Xabsiga Minnesota Correctional Facility–Lino Lakes waxaa la dhigaa ragga qaangaarka ah.

Waxaa loo aqoonsan yahay xarun amni heerkiisu yahay mid hooseeya iyo mid dhexdhexaad ah.

Si aad ula xiriiro qofka aad jeceshahay, booqo mareegta Waaxda Asluubta:

<https://mn.gov/doc/family-visitor/contact-and-general-information/>

Si aad u hesho jadwalka booqasho iyo
macluumaadka barnaamijka ee ugu dambeeyay,
booqo mareegta xarunta: <https://mn.gov/doc/facilities/lino-lakes/>

MCF-Lino-Lakes.doc@state.mn.us

Telefoonka (651) 717-6100

Fakiska (651) 717-6105

7525 Fourth Avenue

Lino Lakes, Minnesota 55014



Moose Lake



Xarunta Asluubta Minnesota–Moose Lake waxaa la dhigaa ragga qaangaarka ah.

Waxaa loo aqoonsan yahay xarun amni heerkiisu dhexdhexaad yahay.

Si aad ula xiriirto qofka aad jeceshahay, booqo mareegta Waaxda Asluubta:

<https://mn.gov/doc/family-visitor/contact-and-general-information/>

Si aad u hesho jadwalka booqasho iyo
macluumaadka barnaamijka ee ugu dambeeyay,
booqo mareegta xarunta: <https://mn.gov/doc/facilities/moose-lake/>

MCF-Willow-River-Moose-Lake.doc@state.mn.us

Telefoonka (218) 485-5000

1000 Lakeshore Drive
Moose Lake, Minnesota 55767



Oak Park Heights



Xarunta Asluubta Minnesota—Oak Park Heights waxaa la dhigaa ragga qaangaarka ah.

Waxaa loo aqoonsan yahay xarun amni heerkiisu yahay mid sare.

Si aad ula xiriiro qofka aad jeceshahay, booqo mareegta Waaxda Asluubta:

<https://mn.gov/doc/family-visitor/contact-and-general-information/>

Si aad u hesho jadwalka booqasho iyo
macluumaadka barnaamijka ee ugu dambeeyay,
booqo mareegta xarunta: <https://mn.gov/doc/facilities/oak-park-heights/>

MCF-Oak-Park-Heights.doc@state.mn.us

Telefoonka (651) 779-1400

Fakiska (651) 779-1385

5329 Osgood Avenue North
Stillwater, Minnesota 55082



Red Wing



Waaxda Asluubta Minnesota—Red Wing waxay u adeegtaa xarunta la dhigo dhallinta aan qaangaarin ahaan. Waxaa sidoo kale la dhigaa ragga qaangaarka ah.

Waxaa loo aqoonsan yahay xarun amni heerkiisu hooseeyo.

Si aad ula xiriirto qofka aad jeceshahay, booqo mareegta Waaxda Asluubta:

<https://mn.gov/doc/family-visitor/contact-and-general-information/>

Si aad u hesho jadwalka booqasho iyo
macluumaadka barnaamijka ee ugu dambeeyay,
booqo mareegta xarunta: <https://mn.gov/doc/facilities/red-wing/>

MCF-Red-Wing.doc@state.mn.us

Telefoonka (651) 267-3600

Fakiska (651) 267-3761

1079 Highway 292

Red Wing, Minnesota 55066



Rush City



Xarunta Asluubta Minnesota–Rush City waxaa la dhigaa ragga qaangaarka ah.

Waxaa loo aqoonsan yahay xarun amni heerkiisu aad u xiran yahay (close security).

Si aad ula xiriiro qofka aad jeceshahay, booqo mareegta Waaxda Asluubta:

<https://mn.gov/doc/family-visitor/contact-and-general-information/>

Si aad u hesho jadwalka booqasho iyo
macluumaadka barnaamijka ee ugu dambeeyay,
booqo mareegta xarunta: <https://mn.gov/doc/facilities/rush-city/>

MCF-Rush-City.doc@state.mn.us

Telefoonka (320) 358-0400

Fakiska (612) 473-5251

7600 525th Street

Rush City, Minnesota 55069



Shakopee



Xarunta Asluubta Minnesota–Shakopee waxaa la dhigaa haweenka qaangaarka ah.

Waxaa loo aqoonsan yahay xarun leh dhammaan heerarka amniga.

Si aad ula xiriiro qofka aad jeceshahay, booqo mareegta Waaxda Asluubta:

<https://mn.gov/doc/family-visitor/contact-and-general-information/>

Si aad u hesho jadwalka booqasho iyo
macluumaadka barnaamijka ee ugu dambeeyay,
booqo mareegta xarunta: <https://mn.gov/doc/facilities/shakopee/>

MCF-Shakopee.doc@state.mn.us

Telefoonka (952) 496-4440

Fakiska (952) 496-4476

1010 West Sixth Avenue
Shakopee, Minnesota 55379



St. Cloud



Xarunta Asluubta Minnesota–St. Cloud waxaa la dhigaa ragga qaangaarka ah waana xarunta diiwaangelinta.

Waxaa loo aqoonsan yahay xarun amni heerkiisu aad u xiran yahay (close security).

Si aad ula xiriirto qofka aad jeceshahay, booqo mareegta Waaxda Asluubta:

<https://mn.gov/doc/family-visitor/contact-and-general-information/>

Si aad u hesho jadwalka booqasho iyo
macluumaadka barnaamijka ee ugu dambeeyay,
booqo mareegta xarunta: <https://mn.gov/doc/facilities/st-cloud/>

MCF-St-Cloud.doc@state.mn.us

Telefoonka (320) 240-3000

2305 Minnesota Boulevard SE
St. Cloud, Minnesota 56304



Stillwater



Xarunta Asluubta Minnesota–Stillwater waxaa la dhigaa ragga qaangaarka ah.

Xarunta Asluubta Minnesota waxay ku hawlan tahay qorsheynta loogu talagalay xiritaanka tartiibta ah ee xarunta si loo gaaro xiritaanka buuxa ee xarunta ugu dambayn 30-ka Juun, 2029. Booqo mareegta waaxda DOC si aad u hesho xog dheeri ah: <https://mn.gov/doc/about/phased-closure-of-mcf-stillwater/>

Si aad ula xiriiro qofka aad jeceshahay, booqo mareegta Waaxda Asluubta:
<https://mn.gov/doc/family-visitor/contact-and-general-information/>

**Si aad u hesho jadwalka booqasho iyo
macluumaadka barnaamijka ee ugu dambeeyay,
booqo mareegta xarunta: <https://mn.gov/doc/facilities/stillwater/>**

MCF-Stillwater.doc@state.mn.us

Telefoonka (651) 779-2700

Fakiska (651) 351-3600

970 Pickett Street North
Bayport, Minnesota 55003



Barnaamijka Caqabada Xabsiyada (Challenge Incarceration Program, CIP)

Barnaamijka Caqabada Xabsiyada (Challenge Incarceration Program, CIP) wuxuu beddel u yahay barnaamijka xabsiga ee taageera koboca gaarka ah, isla xisaabtanka, iyo dib-u-dhexgalka guulaysta ee bulshada. CIP wuxuu isku dhafaa qaab-dhismeedka, daawaynta, iyo xirfad-dhisidda si loo taageero isbeddelka.

Xarunta Asluubta Minnesota–Shakopee



Si aad u hesho jadwalka booqasho iyo macluumaadka barnaamijka ee ugu dambeeyay, booqo <https://mn.gov/doc/facilities/cip-at-togo-willow-river-shakopee/shakopee/>

MCF-Shakopee.doc@state.mn.us

Telefoonka (952) 496-4440

Fakiska (952) 496-4476

1010 West Sixth Avenue
Shakopee, Minnesota 55379

Xarunta Asluubta Minnesota–Togo



Si aad u hesho jadwalka booqasho iyo macluumaadka barnaamijka ee ugu dambeeyay, booqo <https://mn.gov/doc/facilities/cip-at-togo-willow-river-shakopee/togo/>

MCF-Togo.doc@state.mn.us

Telefoonka (218) 376-7878

Fakiska (218) 376-1002

62741 County Road 551
Togo, Minnesota 55723

Xarunta Asluubta Minnesota–Willow River



Si aad u hesho jadwalka booqasho iyo macluumaadka barnaamijka ee ugu dambeeyay, booqo <https://mn.gov/doc/facilities/cip-at-togo-willow-river-shakopee/willow-river/>

MCF-Willow-River-Moose-Lake.doc@state.mn.us

Telefoonka (218) 485-2400

86032 County Highway 61
Willow River, Minnesota 55795

Qiraalada

Hawshani waxaa taageeray maalgelinta Waaxda Asluubta Minnesota mana ay suurtagali lahayn wadashaqeynta iyo hagidda shaqaalaha la'aanteed ee Qaybta Taageerada Qoyska iyo kooxda wadaxiriirka ee waaxda. Ra'yigooda iyo iskaashigooda ayaa door muhiim ah ka qaatay abuurida barnaamijka.

Intaas waxaa dheer, waxaa jiray sagaal qof oo la jecel yahay iyo dad wajahay mahadhooyin nololeed oo bixiyay jawaab-celin si ay u jiheeyaan buug-gacmeedka. Aragtidooda iyo sida ay uga go'an tahay inay xoojiyaan xidhiidhka qoyska ayaa muhiim u ahaa dadaalkani.

Buugani waxaa wada diyaariyay Julie Atella iyo Anna Alba oo qayb ka ah [Wilder Research](#), iyagoo taageero ka helaya Naw-Amelia Kacher, iyo Heather Loch.